



UJEEDDO: CADEYN QAADASHO QAYB DHAXLAYD.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 02/11/2024, Anigoo ah Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa ii yimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

CADEEYE AHNA QAATAHA QISMI DHAXALKA:- HABIBA MOHAMUD ALI, Somali ah, Hooyo: Madina Heyle Asir, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 1939, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P00368803	LA WAREEGAHA DHAXALKA AHNA BIXIYAHA LACAGTA:- ABDI AHMED OSMAN, Hooyo: Sahra Ibrahim Caare, Somali ah, Ku Dhashay: Nakuru-Kenya, Sanadkii: 1973, Degan Muqdisho, Sita: Kenyan Passport, Lr. AK0947740
--	---

B- Aniga oo ah HABIBA MOHAMUD ALI, Somali ah, Waxaan Qoraalkaan Ku Cadeynayaa aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba Ka Fayow Cid I qasabtayna aysan Jirin in Gabadhaydii Marxuumad Leylo Maxamuud Faarax ay Geeriyootay Sida Ku Cad Warqada Dhaxalkoob Ref:-MDH/DMDHK/67/24 Tr-28-10-24 Kana Soo Baxday Maxkamada Degmada Hodan ayna Wada Saxiixayn Kaaliye C/fitaax Maxamed Cabdi iyo Gudoomiye C/llaahi Maxamed Muuse, Waxaana Marxuumada laga Dhaxlay Nus Boos Ku yaal: Muqdisho, Degmada: (Hodan), Cabirka: (20X10)-M, Looto No: 4307-F, W.M.L: (01224/NH/2016), Tr. 25/12/2016, Kana Soo Baxay Nootaayo Horseed, Uuna Saxiixay Dr. Cali Xaashi Cali Ugaas Soodintiisuna tahay Bari: Jid inta kalana Waxaa Ka Xiga Dhul dad, Waxaana Nus Booskaas Lagu Qiimeeyey Lacag Dhan **US\$20,000** "Labaatan Kun oo dollar" Waxaana qismi Dhaxal ahaan iigu Soo Aaday Lacag Dhan **US\$3,333** "Sadax Kun Sadax Boqol Sodon iyo Sadax dollar" Wuxuuna ABDI AHMED OSMAN ahna Ninkii Qabay Gabadhayda Wuxuu Gacanta iga Saaray Lacag Dhan **US\$3,000** "Sadax Kun oo dollar" Lacagta Soo Hartay oo Dhan **US\$333** "Sadax Boqol Sodon iyo Sadax dollar" Waan u Cafiyey, Waxaan ugu Danbeyntii caddeynayaa laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay mida kor ku xusan in aan qaatay qaybtaydii dhaxaleed ee Nus Booska Sare Ku Xusan, isla markaana aysan jirin wax danbe oo aan ku leeyahay Oo aan Ku Sheegan Doono Hantidaas Laga Dhaxalka Gabadhaydii Marxuumad Leylo Maxamuud Faarax aysan jirin, Waxaana Qismigaygii Dhaxaleed Ee iga Soo aaday Marxuumada Sare ku Xusan isiiyay oo Gacanta iga Saaray ABDI AHMED OSMAN isaga ayaana Ku Haray qismigaygii Dhaxaleed.

T- Aniga oo ah ABDI AHMED OSMAN Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan Ku Qancay Cadeynta Sare Ku Xusan.

SAXIIXA CADEEYAHA

HABIBA MOHAMUD ALI

SAXIIXA LOO CADEEYAHA

ABDI AHMED OSMAN

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- IBRAAHIM XASAN CAWAALE

2- CABAAS IBRAAHIN XASAN

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1243/T.P.N/24, Tr. 02/11/2024, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- HABIBA MOHAMUD ALI (Qaataha Qismi Dhaxalka Ahna Cadeeye), 2- ABDI AHMED OSMAN Ahna (Loo Cadeeye) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Cadeyntaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanada Qaada ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



+252 615 223788
+252 615 353330



info@tayonotary.com
www.tayonotary.com




Bakara Market, Near Maalin Tajir
Building, Mogadishu - Somalia

MASAWIRKA CADEEYAHA=
HABIBA MOHAMUD ALI



=MASAWIRKA LOO CADEEYAHA=
ABDI AHMED OSMAN



MASAWIRADA MA'RKHAATIYAASHA

IBRAAHIM XASAN CAWAALE



CABAAS IBRAAHIM XASAN



Muqdisho Maanta oo ay Taariikhdu tahay 02-11-2024 Anigoo ah Farxiyo Maxamuud Faarax Waxaan Cadeynayaa in Cabdi Axmed Cismaan aan Ku Wareejiyey Dukumintiga ay Ku Qoran tahay Laylo Maxamuud Faarax Waana Sidatan:

1-Sabarloog iyo Rasiid Koobi ah Kuna Qoran Labo Boos oo 20X40.M

2-Aatada ay Laylo Wax Ku Milkisay ee Leh Ref:-01224/

3-dhaxalkoobka Marxuumada Lehna Ref no.67/24

4-Wakaalada ay Soo Direen Ilhaan iyo Laylo Lehna Ref 23948/

SAXIIXA WAREEJIYAHA

Farxiyo Maxamuud Faarax



SAXIIXA LOO WAREEJIYAHA

Cabdi Axmed Cismaan



FOOMKA BIXINTA DOCUMENTIGA CADDEYN

REP.1243/2024.

Tr,02/11/2024,

Magaca qaadaha: →

Abdi Ahmed Osman


Meeshuu deganyahay →

Muqaw

Telfoonkiisa: →



SAXIIXA BIXIYAHA:



SAXIIXA QAADAHA:



FOOMKA BIXINTA DOCUMENTIGA CADDEYN

REP.1243/2024.

Tr,02/11/2024,

Magaca qaadaha: →

Ibraahim Xasan Cawaal

Meeshuu deganyahay →

Muqimo

Telfoonkiisa: →

SAXIIXA BIXIYAHA:



SAXIIXA QAADAHA:

